




LEEP

ISBITAALKA ROYAL WOMEN'S HOSPITAL

Waa maxay LEEP?

Erayga LEEP wuxuu u taagan yahay "Loop Electrosurgical Excision Procedure". Waa qaliinsahlan oo unugya yaryar lagaga soo goynayo afka ilmagaaleenka si loo baaro.

Hawshaan waxaa lagu sameeyaa iyadoo qofka lagu samaynayo Suuxin Guud ama mid meel gaara meesha la qalayo ama wax laga goynayo lagu sameeyaa waxaana hawsha lagu qabtaa rugta Unuga Qaliin Maalmeedka, oo ku taal dabaqa 7aad ee Isbitaalka. Haddii suuxintu tahay mid goob keliya ku kooban, afka ilma galeenka ayaa lagu durayaa suuxiso. Taas ayaana suuxin doonta goobta caawimina doonta inaan dhiigbax imaan. Qalab u eg siliq qaloocan ayaa la isticmaali doonaa si looga soo saaro unugyada ama caddadka aan caadiga ahayn ee ilmagaaleenka.



A Royal Women's Hospital Well Women's Publication



Diyaargarawga qaliinka ka hor

Macluumaadka qaliinka, sida waqtiga jiifinta, waxaa ku siin doona xafiiska diyaarinta marka waqtiga la ogaado.

Haddii ay tahay in lagu suuxiyo waxaa lagaaga baahan doonaa inaad timaado rugta caafimaadka ee jiifinta ka hor inta aan lagu qalin horteed. Tani waxay noo suurta gelin doontaa inaan dhamystiro warqadaha muhiimka ah adiguna aad saxiixdo foomka ka raalli noqoshada qaliinka. Waxaana lagaa joojin doonaa cuntada iyo cabitaanka lix saacadood inta aan lagu geyn goobta qaliin maalmeedka. Waxaad fili kartaa inaad Isbitaalka joogto ilaa 5 saacadood waxaana lagu raadin doonaa qof kuu kaxeeya guriga suuxiska dartiis.

Maxaa dhacaya markaas ka dib?

Unugyada la soo gooyey ayaa loo dirayaa sheybaarka halkaas oo lagu baari doono mikro-iskoob. Waan kula socodsiin doonaa natiijooyinka.

Haddii qaliinku ahaa mid guud, waxaa lagus weydiisan doonaa inaad ku nasato halka dadka la suuxieyey nastaan 1 ilaa 2 saacadood. Waxaana lagu siin doonaa waxyaalla khafiifa. Haddii hal meel uun lagaa suuxiyey uma baahid inaad sugto. Marka hawshaan la qabto waxaa lagugula talinayaa in aadan isticmaalin taambooni ama aadan u tegin ninkaaga (isu galmood) 3 ilaa 4 asbuuc si ilma galeenka afkiisu u raysto. Waxaa laga yaabaa inaad isku aragto dheecaan ama dhiig yar oo kaa soo baxa ilaa afar asbuuc marka wax lagugu sameeyo ka dib.

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad intaas ka badan fadlan wac kalkaaliyaha caafimaadka ee qaabilsan unugyada u kora sida aan caadiga ahayn tel: (03) 9344 2987. Haddii kalkaaliye aan la helli karin, fadlan dhaaf farriin adoo sheegaya magacaaga iyo telefoon nambarkaaga.